SEIU HEALTHCARE NW TRAINING PARTNERSHIP

**Iskaa Udarsidda Amni Sugida iyo Jiheynta**

## FURAHA JAWAABTA

**Qor seddex shay oo aad samayn karto si aad gacan uga geysata amni sugida qol kasta oo hoos ku yaala:**

| Amni Sugida Jikada | Amni sugida Musqusha | Amni Sugida Qolka Jiifka |
|---|---|---|
| Dib u soo celi gacanta digsiga | Musqusha qubayska dhexdeeda u isticmaal shandadaha yare ee aan lagu sariimbaxaynin | Hubi in si wanaagsan u wada iftiimayo |
| Ha xiranin gacmo dheere | Katiifadaha kor u qaad | Kuraasta dhig sagxad siman |
| Isticmaal weelal ama sanaadiiq si sahlan loo qaadi karo | Isticmaal qalab ku kaalmaynaya sida kuraasta lagu qubaysto | Alaabta aad u baahan tahay dhigo meel sariirta u dhow |

Waxaa jiri kara jawaabo kale oo macquul ah oo aanan halkaan ku qorneyn oo ah jawaabo la aqbali karo.

**Muddo intee la'eg ayaad dhaqaysaa gacmahaaga?** 20 Ilbiriqsi **Waa maxay macnaha "OR"?** Arag, Soo Sheeg

**Goormaa ayay tahay inaad dhaqdo gacmahaaga?** Waa inaad dhaqdaa mar kasta oo aad hawl bilaabaysid ama aad dhamayso.

**Sheeg seddex shay oo dhici kara marka aad kalyanti la shaqeyneysid oo ay tahay inaad soo sheegtid.**

**Jawaabaha macquulka ah:**

1. Kalyantigaaga oo kufa
2. Kalyantigaaga oo gala khalad daaweyn
3. Aragtidaada kalyantiga oo ka duwan tan khadla asalka ah
4. Haddii aad aragto dayac ama is dayacid
5. Haddii uu kalyantigaaga ku handado inuu is dhaawacayo ama uu qof kale dhaawacayo
6. Haddii lagu weydiiyo wax aanan ku jirin qorshaha daryeelka.
7. Haddii uu kalyantigaaga diido inuu u cuno sida ku cad qorshaha cunnada ee qorshaha daryeelka
8. Haddii uu Kalyantigaaga diido ADLs, sida qubaysashada

   Waxaa jiri kara jawaabooyin kale oo macquul ah oo aan halkaan ku qorneyn balse ah jawaabooyin la aqbali karo.

**Samee liis seddex jalaafo halis ah oo aad ku arki karto guriga kalyantigaaga.**

**Jawaabaha macquulka ah:**

1. Xarig ama fiilo yaala wadada lagu socdo

©SEIU Tababarka Iskaashiga ee Healthcare NW Luulyo 2011

2. Katiifad ama derinta dhulka
3. Alaab ku rasaysan dhulka ama jaranjarooyinka
4. Wadada lagu socdo oo kor u kacsan
5. Jaranjarooyinka laga soo degayo
6. Jaranjarooyin iftiinkooda liito

   Waxaa jiri kara jawaabooyin kale oo macquul ah oo aan halkaan ku qorneyn balse ah jawaabooyin la aqbali karo.

**Qor shan siyaalood uu Kaaliyaga ku daryeelka guriga uu uga caawin karo ka hortaga fidida caabuqa iyo cudurka.**

**Jawaabaha macquulka ah:**

1. Nadaafadda gacanta
2. Xirashada PPE (Qalabka Badbaadinta Shakhsiga)
3. Tallaalada
4. Nadiifinta iyo Caabuq-ka baabi'inta
5. Wasakh Tuurida Haboon

**Waa maxay sedex shay oo aad samayn karto si aad una raacdo is daryeelida ugu muhiimsan?**

**Jawaabaha macquulka ah:**

1. Kalyantigaaga su'aalo weydii islamarkaana la hadal
2. Si fudud u dheh si aad u hubiso inaad fahamtay
3. Kalyantigaaga weydii waxa uu isaga ama iyada doonayso  taasna raac.
4. La hadal xubnaha kooxda daryeelka
5. La hadal horjoogahaaga ama maamulaha kayska
6. Waqti ku filan u hel si aad ula qorshayso Kalyantigaaga
7. Kalyantigaaga weydii howlaha ay rabaan in la qabto iyo sida ay u rabaan in loo qabto
8. Kalyantigaaga weydii howlaha ay rabaan in ugu horeyntii la qabto

   Waxaa jiri kara jawaabooyin kale oo macquul ah oo aan halkaan ku qorneyn balse ah jawaabooyin la aqbali karo.

**Buuxi shaxda howlaha macquulka ah ee uu kaaliyaha daryelka guriga uu ka caawin karo:**

| | | | |
|---|---|---|---|
| Qubeyska | Cunno karinta | Dukaameysiga adeeggida | Dhar u xiridda |
| Cunno cunsiin | Soo socodiin/soo warwareejin | Dhaqid | Musqul geyn |

©SEIU Tababarka Iskaashiga ee Healthcare NW Luulyo 2011

| | | | |
|---|---|---|---|
| Nooc kasta oo jimicsi dhaqdhaqaaqa ah | Hadlid iyo Dhagaysasho | La xiriirid (haddii uu kalyantiga dhib qabo | Ka caawinta kumbiyuutarka |
| Ka caawinta daawada | Qorshaynta cunnada | U aqrin | Ballamo sameysiga |

Waxaa jiri kara jawaabooyin kale oo macquul ah oo aan halkaan ku qorneyn balse ah jawaabooyin la aqbali karo.

**Su'aalo laga baaraan degay:**

1. Waa maxay qorshaha xaaladda deg degga ah ee gurigaaga iyo guriga kalyantigaaga?

   **Jawaabta macquulka ah:** Qorsho xaaladda deg degga ah waa in loo sameeyaa gurigaaga iyo guriga kalyantigaaga. Waxaa mar walba wanaagsan in la yaqaano meelaha laga bixi karo iyo meelaha qalabka xaaladda deg deg ah ay yaalaan. Sidoo kale, qorshaha xaaladda deg dega ah waa in la hubiyaa in waxa uunka sheega ee qol walba inay shaqeynayaan. Kala hadal kalyantigaaga sida loo baxsanayo haddii xaalad deg deg ah ay dhacdo taasoo ay caawinaad ugu baahan yihiin haddii ay xaalad deg deg ah dhacdo.

2. Waa maxay doorka aad ku leedahay kooxda daryeelka?

   **Jawaabta macquulka ah:** doorka uu Kaaliyaha Daaryeelka Guriga uu ku leeyahay kooxda daryeelka waa mid aad muhiim u ah. Waxaad tahay qofka si joogta ah maalin walba u arka Kalyantiga, waxaadna munaasib u tahay inaad ka soo warbixiso isbedelada ku yimaada caafimaadka kalyantigaaga iyo xaaladdda shucuurtooda. Doorkaaga waa inaad ka soo warbixisaa wax kasta oo aad u arkayso inay ku dhibaateyn karto ama ay kalyantigaaga dhibaateyn karto, islamarkaana waa inaad mararka qaar la hadashaa xubnaha qoyska si ay u ogaadaan. Waa muhiim in la xasuusto in macluumaadka daawooyinka aanan lala socodsiin qof kale oo aanan ka tirsaneen kooxda daryeelka, islamarkaana in sidii warbixiye ku khasban lagaa doonayo inaad xadgudubka ka soo warbixiso.

3. Sidee u qorshaysan kartaa cunadda nafaqada leh ee uu kalyantigaaga jecel yahay?

   **Jawaabta macquulka ah:** Adigoo fiirinaya qorshaha daryeelka, waxaad go'aamin kartaa waxa, hadiiba ay jiraan, ay yihiin dib uhabeynta nafaqada kalyantigaaga.

©SEIU Tababarka Iskaashiga ee Healthcare NW Luulyo 2011

Sidoo kale, waa inaad weydiisaa kalyantigaaga nooca cunnada ay cuni jireen, cunnada ay jecel yihiin iwm. Sidoo kale waxaa weydiin kartaa kalyantigaaga inay doonayaan inay isku dayaan cunnooyin cusub, ama haddii ay doonayaa inay sidii hore u cunaan. Waa inaad taqaanaa inuu kalyantigaaga jecel yahay cunnada bisbaaska leh (iyo haddii uu takhtarka u ogol yahay), iyo cunnada uusan kalyantigaaga cuni karin. Xasuuso, inay mar walba tahay dookha kalyantiga waxay cunnayaan, waqtiga ay cunayaan iyo sida ay u cunayaan, balse waxaad cunnadooda ka dhigi kartaa mid khibrad farxad leh adigoo u qorshaynaya kalyantigaaga, karinta cunnada uu kalyantigaaga jecel yahay, iyo inaad miiska u dhigtid si cunidda u noqoto dhacdo raaxo ah, ee aanan aheyn shaqo dhib badan.

©SEIU Tababarka Iskaashiga ee Healthcare NW Luulyo 2011